

Ku darista Talaallada diiwaanka MIIC

Haddii diiwaanka Xariirka Xogta ee Talaalka Minnesota Minnesota Immunization Information Connection (MIIC) ay ka maqan yihiin xogta talaal aad qaadatay Aadna hayso xogta, aad gudbin karto a [MIIC Public Inquiry Form \(https://redcap.health.state.mn.us/redcap/surveys/?s=Y3JCL3NDE7FPEXAM\)](https://redcap.health.state.mn.us/redcap/surveys/?s=Y3JCL3NDE7FPEXAM) codsi ku socda Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) iyadoo la siinayo cadayn la aqbali karo oo ku saabsan tallaalka.

Caddaynta la aqbali karo

- Waraaqda rasmiga ah ama dukumiinti elektaroonig ah oo ka imaanaaya cidda talaalka bixisay. Kan waxaa ku jiri kara dukumiintiyada ka yimaada ablikeeshinka caafimaadka sida MyChart ama kuwa lamidka kaartooyinka qoraalka ee hay'adooyinka aan qoraalada qoray, ama kaartiga tallaalka COVID-19 ee Hay'adda Xakamaynta Caafimaadka iyo Cudurka (CDC).
- Foomka Diiwaanka Talaalka Qofka ee Waaxda Arimaha Gudaha ee maraykanka DS-3025 taas waxaa kamid ah talaallada hore ee qofka ee la xaqiijiyay.
- Caddaynta Rasmiga ah ee Shahaadada Talaalka ama Prophylaxis (kaarka jaallaha ah).

Dirista cadaynta talaalka

Dukumiintiga waa in lagu qoraa taariikhda talaalka (bisha, Maalinta iyo Sanadka); nooca talaalka ama maadada; iyo magaca iyo taariikhda Dhalashada qofka. Caddaynta tallaalka waa in la soo diraa ugu yaraan todoba maalmood ka dib taarikhda ugu dambeeysa ee diiwaanka tallaalka ku xusan si adeegayaasha caafimaadka waqtii ugu helaan inay xogta u gudbiyaan MIIC.

Ogsoonoow: Haddii aad go'aansato inaad ku dirto iimeelka, waxaan ku talinaynaa inaad ku dirto iimeel baasaweer adag leh si aad u ilaalso xogtaada gaarka ah ee caafimaadka.

Haddii aad ku heshay talaalka gobal kale, waxaad ka helaysaa xogta lagala xariiraayo Nidaamka Xogta Talaalka ee gobalkaas (IIS) [CDC: Contacts for IIS Immunization Records \(www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/contacts-locate-records.html\)](https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/contacts-locate-records.html).

Minnesota Department of Health
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
www.health.state.mn.us/miic (Somali)

06/05/2024

Si aad u hesho macluumaadkaan oo qaab kale ah, wac: 651-201-3980.